

Ma uur ayaad leedahay? Ma haysataa caymis caafimaad? Ma og tahay haddii caymiskaaga uu kaa bixinayo goorta aad dhasho?

Haddii aad uur leedahay oo caymiskaaga gaarka ah aanu bixin doonin qarashka marka aad dhallayso dhallaankaaga, waxaa dhici karta in aad u qalanto caymiska TennCare inta aad uurkaaga leedahay. TennCare waa barnaamijka caymiska Medicaid ee Tennessee. Waxaa jira dad badan oo aan ogeyn inay isla haysan karin Caymiska Caafimaadka ee TennCare iyo Caymiska Caafimaadka ee Gaar ah labaduba. TennCare waxay kaa caawin doontaa inay bixiso adeegyada caafimaadka ee ayna kaa bixin caymiskaaga caafimaadka ee gaarka ah. Haddii aad haysato caymiska TennCare ama CoverKids laga bilaabo taariikhdooda dhalashada. Sidoo kale waxaad buuxsan kartaa caymis caafimaad oo loogu talagalay dhallaankaaga ilaa dhallaanka uu ka dhasho. Aysan ka ahayn haddii aad haysato caymiska TennCare ama CoverKids markaad dhasho, caymiska TennCare ee dhallaankaaga wuxuu bilaaban doonaa taariikhda aad soo codsato. Waxaa muhiim ah in an caymiska caafimaadka ee dhallaankaaga aad haysato ka hor intaadan dhallin, maxaa yeelay way adkaan kartaa in aad wakhti u hesho in aad u dalabto dhallaankaga taariikhda uu dhasho. Haddii arjiga la soo daahiyo, waxaa dhici karta in dhallaankaaga uusan haysan caymis inta lagu jiro maalmaha ugu horeeyo ee noloshiisa.

Yaa u Qalmo Caymiska TennCare iyo CoverKids?

Shaqsiyaadka uurka leh ee degan gobalka Tennessee ee haysta dhalashada Mareykanka ama kuwa aan u dhalan ee u qalma ayaa laga yaabaa inay u qalmaan caymiska TennCare. Waxaa dhici karta in aad u qalanto marka daqligaaga yahay ilaa boqolkiiba 200% ee sadarka saboolnimada dowladda federaalka (FPL) ama qiyaastii \$52,400 sanadkiiba qoys ka kooban afar qof. Haddii dakhligaagu ka badan yahay boqolkiiba 200% FPL, weli waad u-qalmi kartaa haddii aad leedahay biilal caafimaad oo sarreeya ama deyn. Kuwa aan buuxin shuruudaha muwaadinnimo ama xadka dakhliga, waxaad u qalmi kartaa CoverKids. Waxaad noqon kartaa qof daqligiisu garaayo boqolkiiba 250% FPL ama qiyaastii dakhliga soo gala gaaraya \$65,500 oona ka kooban afar qof. In kasta oo aadan haysan karin caymiska CoverKids oo haysta caymis gaar loo leeyahay, oo aanu la'hayn isla manfacyada uu bixiyo barnaamijka caymska TennCare.

Hel Caawinaad!

Haddii aad uur leedahay oo aad caymis caafimaad ugu baahan tahay naftaada ama ilmahaaga aan dhalan, Xarunta Caddaaladda ee Tennessee ka wac 1-844-478-KIDS (5437) si aad u hesho gargaar bilaash ah.